

Gacaliyayaal Waalidiinta/Wakiilada:

Sharciga Federaalka ayaa ku qasbaya Gobolka Washington inu u sameeyo qiyaas ku saabsan kobcinta xirfadaha barashada afga Ingiriisida iyo horumarka waxbarasho ee carruurta baranaya Ingiriisida. Dugsiyadu waxay ku imtixaamaan ardayda baranaya Ingiriisida sannad walba Imtixaanka Aqoonta Luqadda “Washington Language Proficiency Test (WLPT-II)”, kaas oo qiyaasa aqoonta Ingiriisida ee xirfadaha akhriska, qorista, hadalka iyo maqalka.

Barnaamijyada ardayda baranaya Ingiriisidu waa inay lahaadaan sadex tilmaamood, oo loo yaqaan himilooyinka qiyaasta sannadlaha ee horumarka “annual measurable achievement objectives (AMAO)”. 30 maalmood gudahood helitaanka ogeysiiska gobolka, degmooyinka waxa laga rabaa inay ogeysiiyaan waalidiinta ardayda baranaya Ingiriisida haddii degmadu ku guuleysan-waydo mid ama wax ka badan ujeedooyinka AMAO. Sannadkii hore, degmadeenu kumay guuleysan mid ama wax ka badan ee ujeedooyinka soo socda:

**Degmadu waa buuxisay AMAO 1: \_\_\_\_\_ Haa \_\_\_\_\_ Maya**

AMAO 1 waxay qiyaastaa korodhka sannadlaha ee tirada ama boqolkiiba ardayda samaysay horumar xagga barashada Ingiriisida. Gudaha *INSERT SCHOOL YEAR* sannad dugsiyeedka, *INSERT NUMBER%* ardayda degmda ee sameeyey horumar xagga barashada, iyo bartimaameedka gobolka oo ah *INSERT NUMBER%*.

**Degmadu waa buuxisay AMOA 2: \_\_\_\_\_ Haa \_\_\_\_\_ Maya**

AMAO 2 waxay qiyaastaa korodhka sannadlaha ee tirada ama boqolkiiba ardayda helay aqoon Ingiriisi. Gudaha *INSERT SCHOOL YEAR* sannad dugsiyeedka, *INSERT NUMBER%* ardayda degmda ee si guul leh uga gudbay barnaamijka horumarka Ingiriisida, iyo bartimaameedka gobolka oo ah *INSERT NUMBER%*.

**Degmadu waa buuxisay AMAO 3: \_\_\_\_\_ Haa \_\_\_\_\_ Maya**

AMAO 3 waxay qiyaastaa korodhka sannadlaha ee tirada ama boqolkiiba ardayda ee Ingiriisda barta ee gaadhay heerka aqoonta ee akhriska iyo xisaabta ku salaysan qiyaasaha gobolka.

Haddii aad su’aalo qabto ku saabsan ilmahaagu siduu wax u barto, fadlan la xidhiidh dugsiiga ilmaha. Midda kale, dugsiiga kala xidhiidh macluumaadka barnaamijyada degmada gudaheeda ee ka gargaara barashada Ingiriisida, helitaanka aqoon Ingiriisi iyo gaadhitaanka bartilmaameedyada aqoonta.

Si daacadnimo leh,